# Oggolaansho Ka Bixinta Ka-qaybqaadashada Cilmi-baarista

**Cinwaanka Daraasadda:**

**Hogaanka Cilmi-baarista:**

Waxaa lagaa codsaayaa inaad ka qaybqaadato daraasad cilmi baaris ah. Kahor intaadan oggolaansho ka bixin, waa in marka hore lagu siiyo guudmarka daraasadda cilmi-baarista. Guudmarkan waa inay ka koobnaadaan macluumaadka muhiimka ee kaa caawin kara inaad fahanto sababaha laga yaabo inaad u baahan tahay ama aadan ugu baahnayn ka qaybqaadashada daraasadda.

Ka-qaybqaadashadaada cilmi-baaristan waa ikhtiyaari, oo laguguma ciqaabi doono ama ma lumin doontid wax gunnooyin ah haddii aadan doonayn inaad ka qaybqaadato ama aad go'aansato inaad iska joojiso ka qeybqaadashada daraasadda.

Xubin ka tirsan kooxda daraasadda ayaa ku siin doona faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan daraasadda, faahfaahintaas oo ay tahay inay ku jiraan:

1. Sababta ay daraasadda u sameynayaan (ujeeddada daraasadda)
2. Muddada ay qaadan doonto ka-qaybqaadashadaada daraasadda iyo waxa aad ku samayn doonto cilmi-baarista
3. Wixii habraacyo ah oo tijaabo ah
4. Wixii khataro ama raaxo-darro ah oo ay ka warhayaan
5. Wixii gunnooyin ah oo faa’iido kuu leh adiga ama dadka kale
6. Habraacyada ama daawaynta beddelka ah ee loo heli karo xaaladdaada caafimaad
7. Sida loo ilaalin doono qarsoodinimada, sirta, iyo badbaadada macluumaadkaaga

Hadba meeshii ay ku khuseyso, xubin ka tirsan kooxda daraasadda waa inuu sidoo kale kuu sheego:

1. Qorshaha lacag-bixinta iyo/ama daawaynta caafimaadka ee la heli doono haddii ay waxyeello kaa soo gaarto daraasadda
2. Suurtagalnimada ah inay dhacaan khataraha aan la filayn
3. Duruufaha keeni kara in cilmi-baaraha laga yaabo inuu joojiyo ka-qaybqaadashadaada daraasadda
4. Wax ku saabsan wixii kharashaad dheeri ah oo kugu kacaya si aad uga qaybqaadato daraasadda
5. Maxaa dhacaya haddii aad go'aansato inaad joojiso ka qaybqaadashada daraasadda
6. Goorta laguu sheegdoono natiijooyin cusub ee daraasadda kuwaas oo saamayn ku yeelan kara rabitaankaaga ka qaybqaadashada daraasadda
7. Immisa qof ayaa ka qaybqaadan doonta daraasadda
8. U isticmaalista muunadahaaga bayoolojiga faa'iido ganacsiga
9. Haddii laguu sheegi doono natiijada ka soo baxday cilmi-baaristaada
10. Haddii cilmi-baarista ay ku jiri karto isku-xigxiga hide-sidaha oo dhamaystiran; iyo

11. Wixii isticmaal cilmi-baariseed ah oo mustaqbalka loo isticmaali doono macluumaadkaaga ama muunadahaaga bayoolojiga
12. Loogu talagalay tijaabooyin caafimaad: "Sharaxaadda tijaabadan caafimaad waxa la heli doonaa *http://www.ClinicalTrials.gov*, sida uu dhigayo sharciga Maraykanka. Websaydkan kuma jiri doono macluumaad adiga lagugu aqoonsan karo. Ugu badnaan, websaydka waxaa la soo gelin doonaa guudmarka natiijooyinka cilmi-baarista. Waxaad raadin kartaa oo aad eegi kartaa Websaydka wakhti kasta."

Waxaad ___________________________ (magaca) kala xiriiri kartaa __________________ (lambarka taleefanka) mar kasta oo aad su'aalo ka qabto cilmi-baarista.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan xuquuqahaaga ka qaybqaataha cilmi-baarista ahaan, ama haddii aad qabto wax walaac ah ama cabasho ah oo ku saabsan cilmi-baarista, waxaad Agaasimaha Waaxda U Hogaansanaanta Cilmi-baarista *(Research Compliance Department)* kala xiriiri kartaa 734-712-5470.

Haddii aad ogolaato inaad ka qaybqaadato daraasadda, waxaa lagu siin doonaa nuqul saxeexan oo dukumeentigan ah iyo qoraal guudmar ah oo ku saabsan cilmi-baaristan.

| ______________________________ | ____________________________ | ________________ |
|---|---|---|
| Saxeexa Ka-qaybqaataha | Magaca Ka-qaybqaataha oo Far Waaweyn ah | Taariikhda |
| ______________________________ | ____________________________ | ________________ |
| Saxeexa Markhaatiga (Turjumaan) | Magaca Turjumaanka oo Far Waaweyn ah | Taariikhda |
| ______________________________ | ____________________________ | ________________ |
| Saxeexa Qofka Bixinaya Macluumaadka / Qaadaya Oggolaansho Bixinta | Magaca Far Waaweyn ah ku qoran ee Qofka Bixinaya Macluumaadka / Qaadaya Oggolaansho Bixinta | Taariikhda |